



Australian Government

COVID-19
VACCINATION

Talaalka COVID-19 ayaa lagula taliyey carruurta qaarkood jirta 6 bilood ilaa 4 sanadood

07 Sebtembar 2022

Khubarada talaalka Australia, Australian Technical Advisory Group on Immunisation, waxay soo jeediyaan in talaalka COVID-19 ee carruurta jirta 6 bilood ilaa 4 sanadood oo difaaca jirkoodu liito, qaba iin, iyo kuwa xaallada caafimaad oo kala duwan iyo/ama xaallada caafimaad oo siyaadisa khatarahooda COVID-19 aadka u xun.

Kuwaas waxaa ku jira carruur qabta xaallada la mid ah kuwaas:

- Difaac-la'aan aad u xun ama dhexdhexaad ah, kuwaas oo ay ku jiraan kuwa laga daawaynayo kansarka, ama daaweyn hoos u dhigaysa difaaca;
- Lafta dhuuxa ama stem Cell transplant-ga, ama daaweynta T-cell-ka chimeric antigen (CAR-T);
- Cudurada wadnaha ee lagu dhasho oo qalafsan;
- Qaabka hawa mareenka oo aan caadi ah ama cudurka sanbabka;
- Sonkorowga nooca 1 (Type 1 diabetes) ee mellitus;
- Xaallad qalafsan oo xididada maskaxada ama muruqyada; ama
- iin u baahan caawima isdabajoog ah ee xarakaadka nolol maalmeedka, sida cerebral palsy ama Down Syndrome (Trisomy 21).

Carruurtaani waxay leeyihiin khatar siyaada ah inay aad ugu jiradaan COVID-19. Talaalka lidka COVID-19 wuxuu caawin doonaa hoos u dhigo khatarta.

Carruurta jirta 6 bilood ilaa 4 sanadood kuwaas oo aan ku jirin liiska kuwa xaqa u leh ayaa leh khatar hoose inay yeeshaan jiro aad u daran oo ah COVID-19. Iyaga **laguma** talinayo inay qaataan talaalka COVID-19 waqtigaan.

Talaalkee carruurta jirta 6 bilood ilaa 4 sanadood qaadanayaan?

Carruurta u qalma ee jira 6 bilood ilaa 4 sanadood waxaa lagula talinayaa 2 qadar oo talaalka COVID-19, oo kala durugsan 8 asbuuc. Carruurta qaarkood oo difaacoodu liito ayaa laga yaabaa inay u baahan yihiin 3 qadar. Carruurta da'daan jirta ayaa awooda inay qaataan talaalka Spikevax (Moderna).

Talaalkee ayaa carruurta jirta 5 sanadood iyo ka weyni ay qaadan karaan?

Dhamaan carruurta jirta 5 sanadood iyo ka weyn ayaa qaadan kara talaalka COVID-19 hadda.

Carruurta jirta 5 sanadood iyo ka weyn ayaa laga yaabaa inay qaataan talaalka ama Moderna ama Pfizer talaalka COVID-19. Carruurta da'doodu tahay 5 sano iyo ka weyn waxaa lagula talinayaa inay qaataan 2 dhoos oo tallaalka COVID-19 ah, oo la siiyo iyadoo loo dhaxeysiineyo 8 toddobaad. Carruurta qaarkood oo leh immunocompromise (difaaca jidhka oo liita) oo aad u daran ayaa laga yaabaa inay u baahdaan 3 dhoos.

Waxaa la doorbiday in carruurta jirta 5 sanadood iyo ka weyn ay qaataan isla nooca talaalka labada qadarba.

Talaalada COVID-19 iyo talaalada kale

The Australian Technical Advisory Group on Immunisation wuxuu ku talinayaa in carruurta jirta 6 bilood ilaa 4 sano ay sugaan intay ka gaarayaan 7 ilaa 14 maalmood inta u dhexaysa talaalkooda iyo talaalada kale, si hoos loogu dhigo khatarta iman karta sida qandhada. Si kasta ha ahaatee, talaalka COVID-19 ayaa la siin karaa isla markii sida talaalada kale haddii ay taxadi ku noqonayso in la siiyo waqtiya kale, sida ku dhowaanta barnaamijyada goobaha durugsan.

Haddii ilmahaaga uu ku dhacay COVID-19

Ilmahaagu waa inuu sugaa 3 bilood ka dib marka baaritaanku muujiyo COVID-19 ka hor intaanay qaadan talaalka COVID-19. Haddii ilmahaagu qaadan karo talaalka, kan ku xiga ee la qorsheeyey ee talaalka COVID-19 waa in la siiyaa sida ugu dhaqsaha badan 3 bilood ka dib. Ilmahaagu waa inuu qaataa dhamaan qadarada loo soo jeediyey iyaga.

Goorma ayaan ilmahayga u samayn karaa ballan si uu u qaato talaalka?

Bookings are now open for eligible children in this age group through the Vaccine Clinic Finder: <https://covid-vaccine.healthdirect.gov.au/booking/>

Si joogto ah dib u eeg, maadaama bixiyeyaasha tallaalku ay sii wadi doonaan inay ku daraan buukino cusub.

Macluumaad dheeraad ah



Macluumaad intaas ka badan booqo www.health.gov.au ama wac Khadka Caawimada Qaranka Coronavirus-ka oo ah 1800 020 080. Riix xalka 8aad ee adeegyada tarjumida ee lacag la'aanta ah.